Waa lagama maarmaan in loo diyaar garoobo xaaladaha deg degga ah. Xaaladaha deg degga ah waxaa ka mid ah kuwa dabiiciga ah sida duufaanada iyo dhul gariirka.noocyada kale waxaa ka mid ahkuwa aadamiga keeno ay ka mid yiyihiin kuwa baayooloogikada, kiimikada ama xaaladaha deg degga ah ee nukliyeerka.

U DIYAAR-GAROW 3

Garan meyno goort ay dhici doonto xaalad degdeg ah. laakiinse waxaa jira wax yaabo aanu qaban karno si aanu ugu diyaar garowno nooc kasta ee xaalad degdeg ah. hadda ood diyaar garawdo hadda waxay badbaadineysaa adiga iyo qoyskaada ee mustaqbalka. U diyaar-garawga 3 waxay waa hab sahlan ee loogu diyaar-garoobo xaalado degdeg ah.

U diyaar-garowga 3 waxay ka kooban tahay saddex tallaabo.

- U samee qorshe naftaada, tan qoyskaada iyo ganacsigaga;
- U diyaari sandduuq guriga, gaadhiga iyo shaqadaba;
- Soo dhageyso waraarka ku saabsan wixii la yeeli lahaa xaaladaha deg degga dhabta ah.

Buuggan wuxuu kaa caawinaya inaad baraato saddexda nooc ee xaaladaha degdegga ah:baayooloojikada, kiimikada iyo nukliyeerka.

XAALADAHA DEGDEGGA AH EE BAAYOOLOOJIKADA

Baakteeriyada, fayraska iyo suunta ay sameysay baakteeriyadawaxay keeni karaan xaalad deg deg ah ee baayooloojikada. Waxaa lgu buufin karaa hawada ama meelaha cunada ama biyaha la cabbo.

Maxaan sameeya kolkay jirto xaalad deg deg ah ee baayooloogikada?

Dhageyso raadiyawga, talefishinka, ama habka digniinta xaalad degdeg ah si aad u heshid amarro. Heyso raadiyaw ku shaqeeya baateeri, haddii loo baahdo. Saraakiishu waxay kuu sheegi inaad gudah joogto iyo inaad aqalkada ka tagto. Waxay kuu sheegayaan halkaad aadi laheyd haddii ay noqoto inaad aqalka ka tagto.

Habka Waxqabadka Caafimaad ee Columbus iyo Hareeraheeda

L/H Waaxda Caafimadka ee Columbus
Xafiiska U Diyaargarowga Xaalad degdeg Ah
240 Parsons Avenue
Columbus OH 43215
641-645-7800

Habka Waxqabadka Caafimaad ee Columbus iyo Hareeraheeda waa iskaashi ka dhexeeya columbus iyo Kawntiga Farankliin: Hay'adaha sharciga, waaxyada dab demiska; wakiilka maamulka wada ee xaakadaha deg-deg ah; adeegyada caafimaad ee deg degga ah; hay'adaha wax qabashada xaaladaha deg degga ah; ururada caafimaadka dad weynaha; isbitaalada; iyo ka soo qeyb galayaasha kale ee bulshada.

Sidoo kale kooxdani si aad isugu dhow ayey u wada shaqeyaan sida jawaabida iyo qorshegnta wakiilada bilow ilaa dhamaad leh ee State of Ohio.

Columbus & Metropolitan Medical Response System — Domestic Preparedness

Aqri 3-daan akhbaar waa diyaar sida English, Spanish iyo Somaali. Buuga-ogolanshaha iyo kuwa kale ee xaaladaha deg-dega qalabka u diyaar-garoowga waa Diyaar Waaxda Caafimaadka Kolumbus website publichealth.columbus.gov ama waad wici kartaa (614) 645-7089.

U diyaar-garayn khaas ah waa laga yaaba in la sameyo qofka al itaal-la'aan (curyaan) jidka loo maro akhbaarta meesha aad wici karto Columbus & Metropolitan Medical Response System qaabka jawaabta ee waaxda caafimaadka Kolumbus, Xafiiska Xaaladaha Deg-dega ah ee u diyaar-garowga (614) 645-7089.

U diyaar-garawga 3 waxaa markeedi hore loogu talagalay sameeyeyna Waaxda Caafimaadka ee Missouri iyo Adeegyada Waayeelka kolkay ahey bishi Maarso, 2004, si loo baro reer Missouri siday ugu diyaar garoobi lahaayeen xaaladaha degdegga ah.
Rev 9.29.05

HABKA WAXQABADKA CAAFIMAAD EE COLUMBUS IYO HAREERAHEEDA ISKAASHI KA DHEXEEYAA

CABSIDA XAALAD DEG DEG AH EE BAAYOOLOOJIKADA, KIIMIKADA IYO NUKLIYEERKABA

MAXAY TAHAY WAXAAD DOONEYSO INAAD OGAATO

READY IN 3 — THREE STEPS TO PREPARE FOR AN EMERGENCY

Miyey xaalad degdeg ah ee baayooloojikada ii keeneysaa xaanuun?

Waxaa laga yaabaa inaada durbadiiba ogaanin inuu ku helay jeermiga ama sunta keentay xaaladda deg degga ah. Calaamadahu waxay ku xidhan yihiin nooca jeermiga ama sunta keentay xaaladda deg degga ah. qaar caalaamadaha caadiga ah waxa ka mid ah neefsasho dhib ah iyo calaamado la mid ah kuwa hadhgabka. Haddii aad xanuunsato, wac kolkiiba dhakhtarkaada. Waxay kuu sheegayaan inaad:

- Bixiso dharka aad qabto gelisana weel bac ah;
- Ku qubeysato biyo iyo saabbuun;
- Gashato dhar cusub.

Maxaan falaa ka dib xaalad deg deg ah baayooloojikada?

Sii dhageyso raadiyawga, talefishinka iyo habka digniinta xaaladaha deg degga ah si aad u hesho amarro.

XAALADAHA DEGDEGGA AH EE KIIMIKADA

Xaaladaha degdegga ah ee kiimikada waxay dhacaan kolkay hawadu ku sumowdo kiimikooyin waxyeello leh ama lagu daro meelaha cunnada ama biyaha la cabbo. Kiimikoyinkan waa neefsan karaa ama geli karaan jidhka.

Maxaan falaa kolkay jirto xaalad deg deg ah kiimikada?

Sii dhageyso raadiyawga, talefishinka iyo habka digniinta xaaladaha deg degga ah si aad u hesho amarro. Heyso radiyaw ku shaqeeya baateeri, haddii loo baahdo. Saraakishu waxay kuu sheegayaan inaad joogto gudaha aqalka ama ka tagtid. Waxaa laguu sheegi karaa inaad joogto aqalka aadna:

- Xidho habka dabeysha. Waxa kaa mid ah qolka kuleyliyaha, qaboojiyaha, dabeyliyaha iyo marawaxadda.
- Gal qol aan laheyn dariishad. Hubi in qolku ku filan yahay cid kasta ee qolka joogta;
- Hadii lagu faro, ku xidh duleylada qolka koolada adag iyo bacda fidsan. Duleelada qolka waxaa ka mid ah iridaha iyo marinada dabeysha ama dabeyliyaha oo idil.

Miyey xaalad degdeg ah ee kiimikada ii keeneysaa xaanuun?

Kolkay jirto xaalad degdeg ah ee kiimikada, waxaad isku arki kartaacalaamadahan:

- Indho biya leh;
- Dareen jidh gubasho;
- Neefsasho dhib ah;
- Dubaahin/Jareeyn;
- Mergasho;
- Toos u socosho la'aan;
- Wareer.

Haddii aad isku aragto, so wac dhakhtarkaada durbadiiba. Haddii aad isku aagtid indho biya leh iyooogadoo ku gubata, waa inaad:

- Iska dhig dharka, ku rid weel bac ah;
- Ku qubeysato biyo iyo saabbuun laakiin HA xoqin oogadaada;
- Gashato dhar cusub;
- Wac dhakhtarkaada deg-deg ah.

Maxaan falaa ka dib xaalad deg deg ah kiimikada?

Sii dhageyso raadiyawga, talefishinka iyo digniinta xaaladda degdegga ah si aad u hesho amarro.

XAALADAHA DEG DEGGA AH EE NUKLIYEERKA AMA SHUCAACA

Dadku waxay la kulamaan in yar oo shucaaca maalin walba. Nukliyeerka ama shucaaca waxay dadka la kulansiiyaan in badan ee shucaac ah, ayadoo ay ku xidhan tahay nooca xaaladda degdega ah.

Xaalad degdeg ah ee shucaaca waxaa ka mid ah shil ka dhaca warshadda tamarta ee nukliyeerka, qaraxa qalab yar oo nukliyeer ah ama bambka wasakh ah. bamka wasakhda
ah waa wax qarxa sida miinada taasoo sidata wax uu ka dhalan karo shucaaca.

Maxaan falaa kolkay jirto xaalad deg deg ah ee shucaaca?

Saraakiisha ayaa la soconeysa heerka shucaaca markaasna go'aaminaya wixii la fali lahaa. Sii dhageyso raadiyawga, talefishinka iyo habka digniinta xaaladaha deg degga ah si aad u hesho amarro. Heyso radiyaw ku shaqeeya baateeri, haddii loo baahdo. Saraakishu waxay kuu sheegayaan inaad joogto gudaha aqalka ama ka tagtid.
Waxaa laguu sheegi karaa inaad joogto aqalka aadna:

- Xidhto iridaha iyo dariishadaha oo idil
- Demi kuleyliyaha, qaboojiyaha, dabeyliyaha iyo marawaxadda.
- Joog gudaha qol aan laheyn dariishad. Hubi qof waliba jooga qolka heysto boos ku filan.

Haddii laguu sheego inaad baxdo, raac amarka ay ku siinayaan saraakiisha degaanka, soo qaado sandduuqaadi u diyaar garawga xaalad degdeg ah.

Miyey xaalad degdeg ah ee shucaaca ii keeneysaa xaanuun?

Waxaa laga yaabaa in bamka wasakhda ah uusan leh badan oo lagu xanuunsado.khatarta ugu weyni waa qaraxa. Laakiin, waad ku xanuunsan kartaa qarax nukliyeer weyn. Waxay qaadaneysaa dhawr saacadood ilaa maalmo inay soo baxaan calaamado. Dadka qaarkood ma laha wax calaamad ah. qaar kalena waxay leeyihiin mid ama labo calaamad. Calaamadaha loo badan yahay waxaa ka mid ah:

- Maqaark oo casaada;
- Dareen xanuun ama matak;
- Shuban;
- Dareen daal;
- Madax xanuun;
- Af xanuun ama ciridkoo dhiiga.

Haddiii aad dareento xanuun, wac dhakhtarkaada.

Maxaan falaa haddii ka dib xaalad degdeg ah ee shucaac ama nukliyeer?

Sii dhageyso raadyawga, talefishanka, ama habka digniinta xaaladda deg degga ah.